Bayaan

# Alberta waa ay ka xooggan tahay sidii hore: Guddoomiyaha gobolka Smith

Maayo 29, 2024 Su’aalaha warbaahinta

Guddoomiyaha gobolka Danielle Smith wuxuu soo saaray bayaanka soo socda oo ku saabsan sida dowladda Alberta ay si guul ah uga soo baxayso ballamihii ay qaadday:

“Waxay ahayd hal sanno kahor maanta oo kale markii codbixiyeyaasha reer Alberta ay u doorteen dowladeenna markii labaad xilka. Marka ugu horeysa, waxaan rabaa inaan iraahdo inaan u adeego dadka reer Alberta aniga oo gudoomiyaha gobolka ah ay tahay waxa ugu qaalisan noloshayda. Masoo koobi karo sida aan ugu faano gobolkan quruxda badan iyo dadka uu hoyga u yahayba. 12kii bilood ee lasoo dhaafay, dowladeennu waxay si adag uga shaqaynaysay fulinta balimihii badnaa ee ay dadka reer Albderta u qaadnay xiligii doorashada. Waxaan ku faraxsanahay inaan iraahdo in aniga oo la jira kooxda qiimaha badan ee MLAs ee dowladda ka tirsan, wasiirada iyo shaqaalaha dowladda ee gobolka, aan gudanayno waajibaadkeena ah inaan Faa’iidada Alberta (Alberta Advantage) gayno heer aad u sareeya aana xaqiijino in gobolkanu noqdo meesha ugu wanaagsan ee lagu noolaado, laga shaqeeyo, la maalgashado qoysna lagu korsado.

“Ka gudoomiyaha gobolka ahaan, waxaan mar walba u dagaalami doonaa Alberta iyo dadka reer Alberta. Dowladeenu waxay sii ahaanaysaa mid kasoo horjeedda canshuurta dhimista kaarboonka ee federaalka waxayna meelmarisay siyaasado si muuqda utaageeraya dadka reer Alberta intii lagu jiray dhibaatooyinkaan maciishadda ee Canada oo dhan kajiray. Siyaasadaha sida balaarinta fasaxa canshuurta shidaalka oo la gaadhsiiyay ilaa dhammaadka 2023, taasoo dadka reer Alberta u kaydisay in ka badan $2 bilyan, iyo qiimaynta xisaabaadka canshuuraha si dadka reer Alberta ee dadaalka badan ugu kaydsamaan wax badan oo kamid ah waxay shaqaystaan. Waxaan sidoo kale xaqiijinaynaa in dadka da’da ah ee reer Alberta ay si wanaagsan u awoodaan adeegyada ay u baahan yihiin ayada oo la samaynayo qiime dhimis 25 boqolkiiba ah oo loogu tala galay dadka da’da ah ee qayb ka ah adeegyada isku dhafan (registry services).

“Alberta waa hogaamiye lagu kalsoonyahay marka ay noqoto dhanka teknoolojiyadaha yaraysa wasakhda hawada waxaana lagu yaqaanaa inay xal u keento qaar kamid ah baahiyaha tamarta dunida kajira kuwooda ugu adag. Anaga oo ku salaynayna guusha aan ka gaarnay Barnaamijkeena Alberta Petrochemicals Incentive, waxaan keennay Barnaamika Alberta Carbon Capture Incentive si aanu uxoojino oo u dadajino samaynta nidaam cusub oo lagu weelaynayo, lagaga faa’iidaysanayo iyo looguna kaydinayo kaabeyaasha kaarboonka cusub. Arintani waxay Alberta

ka caawinaysaa inay abuurto kaarboon hooseeya mustaqbalka ayna sidoo kale u abuurto shaqooyin badan oo ka yimaada dhaqaalaheena aynu ka samayno ilaha kala duwan.

“Maadaama oo ay tahay matoorka shaqada iyo dhaqaalaha ee Canada, Alberta waxay sii wadaysaa inay qaado canshuurta ugu hooseysa waddanka iyo siyaasadaha ganacsiga ugu wanaagsan. Diisambar 2023, waxaan balaarinay *Xeerka Difaaca Canshuur bixiyeyaasha* si aan u yarayno canshuuraha Alberta una xaqiijino in dowlad danbe aysan kordhin karin canshuuraha ganacsiga iyo dadka ayada oo aan marka hore ogolaansho ansixin ka helin dadka reer Alberta.

“Sannadkaan horaantiisii, waxaan sidoo kale keenay Alberta Calling Moving Bonus kaasoo ka sareeya wixii aan ku ololeynayn. $5,000 oo hal mar ah, oo canshuur celin ah waxay gacan ka gaysan doontaa soo jiidashada shaqaalaha gobolka ka baxsan si ay uga shaqo galaan shaqooyinka xirfadaha ay ka shaqayn karaan, aadkana loogu baahan yahay. Dhaqaalaheena kala jaadka ah micnihiisu waa inay jiraan dad badan oo reer Alberta ah oo ganacsi walba kujira. Waxaa kamid ah qaybta dalxiiskeena waxaanaanu keenay istiraatiijiyad cusub oo dalxiiska ah, taasoo gacan ka gaysanaya kordhinta dhaqaalaha dalxiiska ee Alberta gaarsiinaysana yoolka ah $ 25 bilyan ugu danbayn 2035. Ayada oo qayb ka ah dadaaladaas, waxaan si dhow ula shaqaynaynaa dhinacyada kala duwan ee iskaashigu innaga dhexeeyo si aan u dhisno kaabeyaasha xoojinaya goob heer caalami ah iyo degmo madadaalo oo Calgary laga samaynayo.

“Marka hal abuureyaasha ganacsiga ee First Nations iyo Métis ay guulaystaan, bulshooyinkooda ayaa barwaaqoobaya. Dadka Asalka ah waa inay noqdaan kuwo aan la kaashanayno barwaaqada taasina waa sababta aan u kordhinnay baaxadda damaanadda daymaha Alberta Indigenous Opportunities Corporation anaga oo gaarsiinay $3 bilyan. Waxaanu sidoo kale balaarinay Sanduuqa Aboriginal Business Investment anaga oo gaarsiinay $10 milyan sannad maaliyadeedkeegii 2024-25 si aan ganacsiyada ay leeyihiin bulshada Asalka ah uga faa’iidaystaan fursadaha horumarinta ganacsiga loona hormariyo natiijooyinkooda dhaqan-dhaqaale.

Fal danbiyeedyada mudada dheer soconayay siina xumaanaya ayaa ah dhibaato weyn oo kajirta magaalooyinka Alberta, khaasatan goobahena magaalada bartankeeda ah. Si ay gacan uga gaysato wax ka qabashada arrintaan, dowladeenu waxay lacag siisay 100 booliis ah oo ku sugan Edmonton iyo Calgary, ayada oo ilaa hadda 50 la howlgaliyay. Waxaan sidoo kale furnay xarun guul weyn gaartay oo loogu tala galay hagitaanka iyo kaalmada oo ku taala Edmonton si aan dadka aadka u liita uga caawino helitaanka taageerada ay u baahan yihiin, haddii ay ahaan lahayd inay helaan aqoonsiyada dowladdu bixiso, helitaanka guryaha, daryeelka dhaawacyada, caafimaadka dhimirka iyo taageerada balwadeed iyo dib ula midoobista qoysaskooda. Waxaan kordhinnay maalgalinta Alberta Law Enforcement Response Team gudaha 2023 si aan wax uga qabanno faldanbiyeedyada abaabulan, muuqaalada xunxun ee caruurta laga sameeyo, rabsahadaha ku lug leh xabbadaha iyo ka ganacsiga mukhaadaraadka. Dowladeenu waxay sidoo kale meelmarisay sharciyo si ay u soo saarto barnaamij qalab lugta looga xirayo dambiileyaasha khatarta badan danbigana ku noqnoqda ee damaanadda ku jooga, taasoo caawinaysa ilaalinta dadka reer Alberta gaar ahaana meelayawga siyaasadaha dowladda federaalka ah ay ku guuldaraysteen.

“Alberta waxay leedahay nidaam waxbarasho oo heer caalami ah kaasoo jiilasha mustaqbalka u diyaarinaya inay guulaystaan. Si aan u xaqiijino guushaas, waxaan naga go’an inaan maalgalin dheeraad ah ku bixino tijaabada iyo kaalmada waxbarashada caruurta qabta ootisimka iyo baahiyaha kale ee culculus. Waxaan sidoo kae sare u qaadnay barnaamijyada labada xiisadood (dual-credit programming) iyo diraasaadka xirfadaha iyo teknoolojiyadda si aan u xaqiijino in ardaydu wax ka baran karaan xirfadaha kala duwan ayna si guulleh uga gudbaan waxabarashada dugsiga sare ka danbaysa. Waxana horey ugu sii soconaa dadaalkena aan ku hormarinayno ganacsiyada xirfadda ah waxaana xaqiijinaynaa in dadka reer Alberta ay wax ka ogyihiin, ayna heli karaan, fursadaha diyaarka u ah. Si arintaan loo gaaro, waxaan sii wadaynaa inaan qaybo cusub kusoo darno barnaamijyada aadka loogu baahan yahay, oo ay kujiraan 3,200 oo ah qaybo tababaro ah oo kajira dhammaanba 11 hay’adood oo waxbarashada dugsiga sare ka danbaysa bixiya oo Alberta ku yaala iyo sidoo kale inaan siino maalgalin si aan sare ugu qaadno una horumarino goobahooda waxbarashada. Dhawaantan, waxaan maalgalinay goobta Red Deer Polytechnic’s CIM-TAC waxaana qorshaynaynaa inaan ka shaqaysiino Xarunta NAIT’s Advanced Skills. Xirfadaha. Ganacsigu wuxuu lagama maarmaan u yahay kobaca dhaqaalaha dowladeenuna waxay samaynaysaa wax walba oo ay awoodo si loo gaaro horumarinta xirfadahaas ayada oo ay jiraan baahiyo loo qabo shaqaalaha xoogsatada ah, tanoo ay qayb ka tahay la samaynta iskaashi taariikhi ah International Union of Operating Engineers Local 955 si loo bixiyo tababarada xirfadaha.

“Caafimaadka iyo badqabka dadka reer Alberta waxay muhiim u yihiin xaqiijinta nolol tayo sare leh oo laga helo dhinac walba oo gobolkeena kamid ah. Taasina waa sababta ay nooga go’an tahay nidaamka caafimaadka bulshada oo ah mid xoogga, oo sugan kaasoo u wanaagsan qof walba. Sannadkii lasoo dhaafay, waxaan samaynay dadaal dheeraad ah si aan sare ugu qaadno helitaanka daryeelka caafimaadka oo tayo sare leh. Waxana keenay nidaam loogu tala galay kalkaalisooyinka si dad badan oo reer Alberta ah u helaan bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin, waxaanna ku dhawaaqnay heshiis aan uga shaqaynayno nidaam cusub oo lagu maalgalinayo dhakhaatiirta qoysaska. Intaa waxaa dheer, dowladeenu waxay balaarisay qoondada baaritaanada caruurta dhalanaysa si looga baaro xanuuno iyo xaalado dheeraad ah waxayna u qoondaysay $10 milyan si ay u taageerto horumarinta istiraatiijiyadda umulisooyinka gobolka oo dhan. Waxaanu sidoo kale siinaynaa $10 milyan labada sanno ee soo socota Alberta Women’s Health Foundation Legacy Grant iyo $10 milyan oo dheeraad ah oo la siinayo Calgary Health Foundation si cilmibaaris loogu sameeyo caafimaadka dumarka.

“Waxaan sii wadaynaa dhisidda nidaam ku salaysan soo bogsashada tanoo baddal unoqon doonta qaabka daawayneed ee hadda. Si aan arintaan u xoojino, dowladeenu waxay u qoondaysay $1.55 bilyan si loo balaariyo caafimaadka dhimirka iyo daryeelka balwada, kuwaas oo ay kujiraan adeegyada la siinayo dhalinyarada, iyo bulshooyinka First Nations, Métis iyo Inuit iyo maalgalinada lagu smaaynayo caafimaadka dhimirka iyo goobaha daawaynta balwada. Sannadkii lasoo dhaafay, waxaan furnay labadii xarumood ee ugu horeysay oo ka kooban 11 goobood oo soo bogsashada ah oo heer caalami ah si aan dad farabadan fursad ugu siino inay kasoo kabtaan. Maalgalinadaanu waxay muhiim u yihiin sidii bulshooyinka iyo qoysaska Alberta looga dhigayo kuwo caafimaad qaba oo ammaan ah.

“Taageerada qoysaska iyo bulshooyinka caafimaadka qaba waxay sidoo kale nooga baahan tahay ka shaqaynta ciribtirka xadgudubyada jinsiga ku salaysan iyo in la caawiyo dadka ay saameeyeen. Waxaa naga go’an arintan waxaana u qoondaynay $10 milyan oo dheeraad ah hoyyada xaaladaha degdega ah ee loogu talo galay dumarka Alberta, oo ay kujirto $5 milyan oo loogu talo galay in lagu kordhiyo sariiraha iyo loona maalgaliyo goobo hadda bilaa shaqaale ah. Waxaa sidoo kale naga go’an $10 milyan saddexda sanno ee soo socota si aan u taageerno xarumaha dhibaatooyinka galmada wax looga qabto ee gobolka oo dhan.

“Waxaan sidoo kale si aan hagar lahayn uga shaqaynaynay sidii aan qoysaska iyo bulshooyinka Alberta uga dhigi lahayn kuwo ka nabad gala dabka kaymaha ee sannadkan. Maalaglinta cusub waxay keentay shaqaale iyo howlwadeeno dabka kaymaha ka shaqeeya oo dheeraad ah, oo ay kamid yihiin hilikobtaro habeenkii wax arka oo cusub si aan dabka ula dagaalno habeenkii, marka heerkulku qabowyahay. Dowladeenu waxay garab taagan tahay dhammaanba dabdamisyada shaqadoodu aadka cajiibka utahay kuwanoo sii wada inay gutaan shaqo wanaagsan. Anaga oo sii leh rajada ah in xaaladaha hadda socdaa ay faa’iido u lahaan doonaan kooxdeena dabka kaymaha, haddana waxaan u diyaarsannahay taageerada baahiyaha dabdamisyada ee soo kordha, mana joojin doonno dadaalkeena.

“Ayada oo dowladeenu ay muddo gaaban waxyaabo badan ku gaartay, haddana waxaa jirta shaqo badan oo u baahan in la qabto. Waxaan rajaynaynaa inaa shaqadaas u qabano Alberta iyo dadkeedaba. Waxaa idardargalinaya fursadaha kajira gobolkan iyo kuwa mastaqbalku usoo socdo. Si wadajir ah, waxaan qoraynaa cutub cusub oo sheekada Alberta ah. Waa sheeko si wayn uga muuqan doonta waddanka oo dhan iyo dunidaba. Ayada oo dowladeena ay sharaf gaar ah u tahay inay sheekada ka sheegto masraxyada iyo qolalka kulamada, haddana waa ugu danbaynta waxaa iska leh qoysaska, shaqaalaha iyo ganacsiyada Alberta ee ka caawinaya bixinta nuxurka kujira.”

## Su’aalaha warbaahinta


### Sam Blackett

587-589-6048
Xoghayaha Saxaafada, Guddoomiyaha Xafiiska